

Tilmaamta neefsashada caloosha

Markuu dareenkeena kaco waxaan mararka qaar ilownaa in aan neefsano. Ama aan qaadana neef yar, oo gun dhow taas oon jirkeena siineynin ilaa inta oxygen uu ubaahanyahay.

Neefsashada caloosha waxay kaa caawisaa in aad dareentid nasasho iyo deqnaansho.

Neefsashada caloosha waxey micnaheedu tahay u neefsashada si tartiib ah oo mug leh inta ey ka buuxsamayso caloosha iyo sanbabada. Waxaad arki kartaa sida calooshaada uweynaaneyso markaad hawo qaadatid. Kadibna banaanka usoo saar hawada si tartiib ah oona daawo sida caloosha ey uyaraaneyso.

Si tartiib ah u daawo markay hawada ku qulquleyso kana soo baxayso jirkaada.

Ciyaar madadaalo leh ee lala yeesho neefsashada caloosha:

Si raaxo leh dhabarka ugu seexo ama kujiifo dhabarkaada.

Mala"awaal in calooshaada ey tahay buufin oo ku buuxsama hawo markaad neef qaadansid, oona hawada baxsanayso markaad neefta soo saaraysid.

Daawo calooshaada oo weynaaneysa misena yaraaneysa markaad neefsanaysid. Waxaad sidookale calooshaada saari kartaa agabka lagu ciciyaaro oona iskuday inaad kor u qaadid si tartiib ah inta macquul-galka ah markaad neef qaadansid iyo si tartiib ah inuu hoose ugu dhaadhaco markale markaad neef soo saareysid.

Waxaad sidookale neefsashada caloosha la samayn kartaa qof aad jeceshahay. Kadibna waxaad isku dayi kartiin midkiin qofka u neefsan kara si qoto dheer oona aad u tartiib tartiibsan.

